Waxbarasho:
Habka waxbarasho ee Norway waxa uu u qaybsamaa saddex qaybood :- Dugsiga hoose /dhexe, dugsiga sare iyo waxbashada jaamicadda/machadada sare.

Dugsiga hoose/dhexe :-
Carruurtu waxa ay dhigataa dugsiga hoose/dhexe 10 sano oo ka bilaabma marka ay 6 jirsadaan. Toddoba sano ee ugu horreeya waxa loo yaqaan dugsiga hoose, saddexda sano ee ugu dambeeyana waxa loo yaqaan dugsiga dhexe. Dugsiyo badan yaa leh fasalada qaabilaadda koowaad (mottaksklasser) ee la geeyo carruurta dalka ku cusub ee aan luqada norwejiga ku hadlin. Dugsiga ay carruurtu ka tirsan tahay ayaa uga raadiya boos fasalka qaabilaadda kowaad haddii loo baahan yahay. Sidoo kale dadka ka weyn 16 sano waxay heli karaan waxbarasho asaasi ah (waxbarashada dugsiga hoose/dhexe) oo lacag la'aan ah. Dadka waaweyni waxay ku qaadan karaan waxbarashada dugsiga hoose/dhexe 1 – 3 sano. Si aad u hesho shahaadada dugsiga hoose/dhexe waa in aad qaadataa maaddooyinka norweji, ingiriisi, xisaab, saynis (natur og miljø) iyo cilmiga bulshada (samfunnsfag). Marka aad qaadato shahaadada dugsiga hoose/dhexe ayaad bilaabo kartaa dugsiga sare. Cinwaanada dugsiyada hoose/dhexe iyo sida loo codsado waxad ka heli kartaa qaybta norwejiga iyo ingiriisida ee boggan.

Dugsiga sare :
Shaqooyinka Norway laga qabto badan koodu waxay u baahan yihiin waxbarasho ka heer sarraysa tan dugsiga hoose/dhexe. Dugsiga sare waxa uu u qaybsamaa laba waaxood :-

1- Waaxda xirfadaha oo aad ku baran karto tusaale ahaan nijaaradda timo-jare, dareewalnimo, kalkaaliye caafimaad heer hoose ah, koranto yaqaanimo ama makaanignimo.
2- Waaxda maaddooyinka guud, dhaqaalaha iyo maamulka oo ah waaxda ardayda u diraaygaraysa waxbarashada sare ee jaamicadaha iyo machadyada sare.

Waxa lagu jiraa dugsiga sare 3 ama 4 sano. Marka aad qaadato hal sano oo koorso gundhig ah (grunnkurs), ayaad u gudibaysaa koorsada ka sarraysa ee loo yaqaan "VK1". Marka koorsadaas la dhammeeyo ayaa ama ardaygu u gudbayaa koorsada ugu dambaysa ee "VK2" ama uu u wareegayaa shirkad uu ku qaadanayo waxbarasho shaqo haddii uu markii hore doortay waaxda xirfadaha. Xilliga waxbarashada shaqadu sida caadiga ah waa laba sano. Haddii aanad soo dhammaysan waxbarashada dugsiga hoose/dhexe ee Norway, afkaaga hooyana aanu norweji ahayn, waxaad codsan kartaa waxbarasho hal sano ah oo ardayda ajnebiga ah loogu diyaariyo sannadka koowaad ee dugsiga sare. Waxa kale oo loo ogol yahay ardayda ajnebiga ah in ay laba sannadood ku qaataan fasalka koowaad ee dugsiga sare iyagoo fasaladoodii hore ku jira. Koorsooyinka fasalka koowaad ee dugsiga sare ee la ogol yahay in laba sano lagu qaato waxa lagu bixiyaa luqada narwejiga oo ah afkii labaad (norsk som andrespråk).

Informasjons- og rådgivningstjenesten ved
Rosenhof voksenopplæringssenter
Dynekilgata 10, 0569 OSLO
Tel: 22 38 77 70 Fax: 22 38 77 80
Epost: irpro@online.no
Web: www.velkommenoslo.no

Ardayda ajnebiga ahi waxa kale oo ay codsan karaan waxbarasho dugsi sare oo saddex sano ah oo ku saabsan waaxda maaddooyinka guud, dhaqaalaha iyo maamulka. Markaa waa in ay dhigtaan fasal u gaar ah ardayda ajnebiga ah. Waxa loo dhigi doonaa luqada norwejiga oo ah sidii luqo labaad, isla markaana waxa la siin doonaa xiisado ingiriisi ah oo dheeraad ah. Waxa kale oo aad xaq u leedahay in aad doorato afkaaga hooyo si uu kuugu noqdo afka saddexaad ee ajnebi. Dadka waaweyni iyana sidoo kale waxa ay heli karaan waxbasho dugsi sare oo lacag la'aan ah, waxana arrintaas uga masuul ah xafiiska waxbarashada dadka waaweyn ee Oslo. Qofka bilaabaya waxbarashada dadka waaweyn waa in uu dhammaystay barashadii luqada ee asaasiga ahayd isla markaana uu aqoon u leeyahay maaddooyinka lagu dhigto dugsiga hoose/dhexe.

Waxbarasho sare – jaamicad iyo machad sare
Qofka doonaya in uu waxbarasho sare ka bilaabo Norway waa in uu buuxiyaa shuruudaha aqbalaadda. Sida ugu badan ee caadiga ah waxa shuruudaha buuxiya dadka ka soo gudbay dugsiga sare ee Norway, laakiin imtixaano dugsiyo sare iyo jaamicado dalal kaleba way buuxin karaan shuruudaha aqbalaadda. Haddii aad codsanayso waxbarasho sare oo aad haysato shahaadooyin laga bixiyey dalal kale, waxa kuu dheer shuruudaha aqbalaadda caadiga ah in aad caddayso aqoonta aad u leedahay luqadaha norwejiga iyo ingiriisida. Wixii faahfaahin ah ka akhri qaybta norwejiga iyo ingiriisiga ee bogga "Velkommenoslo.no".

Waxbarashada jaamicaddu waxa ay inta badan ka kooban tahay oo loo dhigay hab ah maaddooyin kala duwan oo marka la isku daro qofka siinaysa shahaado rasmi ah. Waxbarashada laga qaato Mac-hadada waxbarashada sare waxa ay inta badan qofka u samaysaa xirfad marka uu wax ka barto saddex sano.(tusaale ahaan injineernimo, macalinimo, dhaqaale-yahanimo iyo warfidiyeenimo). Qaybaha waxbarashada ee xirfadaha ku jihaysan waxa inta badan la socda tababarasho shaqo.

Laga bilaabo sannadka waxbarasho ee 2003 da waxa lagu soconayaa habkan cusub ee shahaadooyinka :- "Bachelar", "Master" iyo "PHD" oo bedeli doona habkii hore.

Inta ugu badan ee jaamicadaha iyo mac-hadada waxbarashada sare waxa ay arday cusub qaataan sannadkii hal mar. Sida caadiga ah xilliga kama dambaysta ah ee codsiyada ardayda sidata shahaadooyinka ajnebiga ah la soo xeraynayaa waa 1. da bisha Maarso. Haddii aad sidato shahaado dugsi sare oo Norway ahna waa 15.ka April. Dhammaan codsiyada ku socda dugsiyada dawladda waxa lagu hagaajinayaa xafiiska isu duwidda codsiyada. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan cinwaanada, xilliga kama dambaysta ah ee codsiyada iyo shuruudaha aqbalaadda waxad ka heli kartaa qaybta af-norwejiga iyo ingiriisiga ee boggan www.velkommenoslo.no.

Maalgelin
Haddii aad arday ka tahay waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn, dugsi sare ama jaamicad / mac-had sare, waxad deyn iyo deeq lacageed ka dalban kartaa sanduuqa dawladda ee deymaha waxbarashada. Kaalmada xafiiskan aad ka hesho waxad ku daboolaysaa kharashka kugu baxaya inta aad waxbarashada ku jirto. Qaybka kaalmada ahi iyadu waa deeq aan lagaa rabin, laakiin qaybta deynta ah waxa lagaa doonayaa in aad soo celiso marka aad waxbarashada dhamayso.

Informasjons- og rådgivningstjenesten ved
Rosenhof voksenopplæringssenter
Dynekilgata 10, 0569 OSLO
Tel: 22 38 77 70 Fax: 22 38 77 80
Epost: irpro@online.no
Web: www.velkommenoslo.no